## Waa maxay sababta ka dambaysa foomka oggolaansho bixinta?

Falanqaynta suurtagalka ah ma aha mid uu samaynayo dugsigu laftiisa. Sidaa darteed, magaca hore, magaca dambe, fasalka iyo dugsiga ilmahaaga waa in loo gudbiyaa hawl-wadaha iskaashiga. Oggolaansho bixintaada ayaa loogu baahan yahay arrintaas. Macluumaadkan waxaa loola dhaqmayaa si waafaqsan shuruudaha sharciga waxaana la burburinayaa wax yar ka dib marka la sameeyo falanqaynta suurtagalka ah.

## Maxaa dhacaya marka xigta?

Falanqaynta suurtagalka ah waa mid ka mid ah tillaabooyinka ugu horreeya ee jiheynta xirfada shaqada. Iyadoo ku xiran nooca dugsiga iyo kooxda sanadka, tillaabooyin dheeraad ah ayaa raacaya inta lagu jiro waddada xirfada shaqo.
Websaydka www.elternpower-brandenburg.de waxaad ka heli doontaa macluumaad waxtar leh oo ku saabsan dhammaan wejiyada jiheynta xirfada shaqada ee gobolka Brandenburg.

## Waa maxay hawsha aan qabanayo?

Marka laga hadlayo jiheynta xirfada shaqada, ka waalidiin ahaan waxaad tihiin mid ka mid ah hawl-galayaasha ugu muhiimsan ee ilmahiina. Sidaa darteed, raadi doodo/wadahadalo ku saabsan mawduucan.
Waydii khibradahooda oo ka hadal tallaabooyinka xiga. Tusaale ahaan:

**Maxay yihiin (saddex) waxyaabood ee ugu weyn ee aad ku wanaagsan tahay?**

**Hawshee ayaad sida ugu badan ugu riyaaqday?**

**Maxaad jeclaan lahayd inaad tijaabiso?**
**Macluumaadkee ayaa weli kaa maqan?**

Barta **planet-beruf.de** ayaa sidoo kale talooyin waxtar leh siisa waalidiinta:
https://planet-beruf.de/eltern-und-erziehungsberechtigte

## Xiriir

Qofka ugu horeeya ee lagala xiriirayo dhammaan su'aalaha ku saabsan jiheynta xirfada shaqada iyo falanqaynta suurtagalka ah waa dugsiga ilmahaaga.

Istaambada

## Linkiyo waxtar leh

Wakaalada shaqaaleynta waxay sidoo kale bixiyaan talooyin loogu talagalay waalidiinta kuwaas oo ka caawinaya ilmahooda inay doortaan xirfad shaqo iyo waxbarasho.

www.arbeitsagentur.de/bildung/schule/ tipps-fuer-eltern

MBJS waxay boggeeda intarnetka ku bixisaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jiheynta xirfada shaqada ee gobolka Brandenburg.

mbjs.brandenburg.de/bildung/uebergang- schule-beruf/berufliche-orientierung.html

Xafiiska Mashruuca Falanqaynta suurtagalka ah ee Brandenburg ayaa mas'uul ka ah iskudubaridka iyo hirgelinta falanqaynta suurtagalka ah.

kobra.net
Beratung.Bildung.Brandenburg





Project office
Potential Analysis
Brandenburg
kobra.net GmbH
www.kobranet.de


Laga soo bilaabo 06.02.2024

SOMALI

# Falanqaynta suurtagalka ah

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta




GEFÖRDERT VOM
Bundesministerium für Bildung und Forschung

LAND BRANDENBURG
Ministerium für Bildung, Jugend und Sport

## "Maxaad rabtaa inaad noqoto markaad weynaato?"

Waalidiinta oo dhami waxay u badan tahay inay carruurtooda weydiiyaan su'aashan. Si ilmahaagu uga jawaabo su'aashan marka la gaaro dhamaadka dugsiga, jiheynta xirfada shaqada waxay si baaxad leh uga bilaabataa fasalka 7aad.

**Mid ka mid ah tillaabooyinka ugu horreeya waa falanqaynta suurtagalka ah.**

## Waa maxay falanqaynta suurtagalka ah?

Inta lagu jiro falanqaynta suurtagalka ah, ilmahaagu waxa uu wax badan ka baran doonaa waxyaabaha uu ku wanaagsan yahay iyo waxa uu xiiseeyo. Waxay u sahlaysaa dadka inay la kulmaan guulo waxayna siinaysaa geesinimo ay uga fikiraan mustaqbalkooda.
Kuma saabsana in la aqoonsado lana wanaajiyo waxyaabaha qofku daciif ku yahay. Dhammaadka falanqaynta suurtagalka ah, lama bixinayo talo-bixin xirfadeed ama ku habboonaanshaha qofka ee xirfad shaqo.

Balse, waxaa ilmahaaga lagu dhiirigelinayaa inuu sahamiyo waxa uu xiiseeyo. Ilmuhu waa in uu isagu go'aan ka gaari karaa wadada shaqo ee uu rabo in uu qaado, tusaale ahaan inuu doorto tababar shaqo ku haboon.





## Maxaa dhacaya inta lagu jiro falanqaynta suurtagalka ah?

- Hawlo kala duwan ayaa loo dhamaystirayaa kooxo yaryar ahaan ama qof keligiis ahaan.
- Kartida xirfadeed ayaa la eegayaa lana qiimaynayaa.
- Taas macnaheedu waxay tahay inaan eegno sida ay dhallinyarradu u qabtaan hawlaha, fikradaha ay la yimaadaan iyo sida ay koox ahaan uga shaqeeyaan.
- Tani kuma saabsana aqoon waxbarasho.





Qiyaas ahaan ku dhawaad laba toddobaad, wareysi qiimeyn ah oo saacad barkeed qaadanaya ayaa dhici doona. Adiga ka waalid ahaan waad ka qeybqaadan kartaa.
Wadahadalka ayaa diiradda saari doona khibradaha ilmahaaga iyo waxyaabaha ay ku wanaagsan yihiin ee la arkay. Intaas waxaa sii dheer, ilmahaaga wuxuu heli doonaa talo soo jeedino ku saabsan sida loo sii dabo raaco xirfada shaqo.

Natiijooyinka waxaa lagu diiwaangeliyaa borofaylka waxyaabaha ilmaha uu ku wanaagsan yahay. Borofaylkan waxaa iska leh ilmahaaga waana in lagu kaydiyaa kaarka doorashada xirfadda shaqada. Waxaa loo isticmaali karaa, tusaale ahaan, codsiyada.

## Tusaalaha layliga – guryaha la wadaago

Dhallinyaradu waa inay hagaajiyaan abaartimenti la wadaago. Tusaale ahaan, waa inay ka wada hadlaan sida qolalka loo kala qeybsanayo loona isticmaalayo. Alaabta guryaha waa in la xisaabiyaa oo kirada la qeybsadaa. Si arrintaan loogu guulaysto, dhallinyarada waa inay, oo ka mid yihiin waxyaabaha kale, maskaxda ku hayaan yoolka isla markaana soo jeediyaan talooyin (xirfadaha xallinta dhibaatooyinka), waa inay u doodaan si ujeedo leh (xirfadaha wada xiriirka), oo waa inay aqbalaan fikradaha dadka kale (xirfadaha xallinta khilaafaadka).




## Maxaan u baahan nahay inaan tixgeliyo?

- Falanqaynta suuragalka ah waxaa badanaa lagu sameeyaa dugsiga dibaddiisa waxaana sameeya koox tababaran oo ka socda hawl-galayaal iskaashi la ah dugsiga.
- Wuxuu soconayaa qiyaas ahaan lix saacadood oo ay ku jiraan bareegyada/nasashada.
- Dhallinyarada waxaa loo raacayaa goobta lagu fulinayo hawlaha.

Taas macnaheedu waa in maalin dugsiyeedku uu socon karo wax ka badan sidii caadiga ahayd. Dugsiga ayaa kuu sheegi doona wakhtiyada saxda ah.

